Waxaad gar u leedahay liis dhacdooyinkii aan ku muujinnay xog ku saabsan caafimaadkaaga, aan ka aheyn daaweyn, lacagbixin, hawlo xannaano caafimaad ama meeshii aad si gaara u ugu talisay in la muujiyo, markii aad gudbiso codsi qoraala. Codsigu waa inuu sheego waqtiga muddadii aad rabtay xisaabinta, taasoo ah inay ka yar tahay muddo 6-sano ah iyo iyadoo laga soo bilaabayo Abriil 14/keedii 2003. Liiska codsiga muujinta ee ugu horreeya oo ku siman muddo 12-biooda waa lacag-la'aan; codsiyada kale waxaa la xisaabin doonaa lacago iyadoo la cuskanaayo kharashyada ka yimid liis sameynta. Intaadan kharash gelin baan xog kaa siin doonnaa qiimaha.

Haddii ogeysiiskaan laguugu soo diray ellektroonik ahaan, **waxaad xaq u leedahay xaashi nuskhad ah ee ogeysiiskaan ah.**

Waxaad xaq u leedahay inaad codsato xog caafimaadeedka ku saabsan la-xiriiristaada inuu noqdo qaab qarsoodi ah, sida iyadoo waraaqaha laguugu soo diro cinwaan aan aheyn kan gurigaaga, adigoo qoraal nagu soo ogeysiinaya sida gaar ahaaneed ama meesha aan u adeegsan karno la xiriiristaada.

Waxaad codsan kartaa, iyadoo qoraala, in aannaan u adeegsan ama muujin xog caafimaad oo kugu saabsan daaweyn, lacagbixin ama hawlo xannaano caafimaad ama qofafka ku lug leh xannaanadaada oo laga reebay marka aad si gaar ahaaneed ugu taliso adigu, marka sharcigu doono, marka ay tahay degdeg. Waxaan tixgelin doonnaa codsigaaga **laakiin sharci ahaan nala kama rabo inaan yeelno.** Waxaan kugu wargelin doonnaa go'aankayaga ku saabsan codsigaaga. Dhammaan codsiyada qoran ama garcelisyada ah (appeals) waa in loo soo gudbiyo sarkaalkayaga gaar-lahaanshaha, dhaqammadaan gaar-lahaanshooyinku waxay meelmar ahaayeen laga soo bilaabo Abriil 14/ keedii, 2003.

Ashtakooyin

Haddii aad daneynayso in xuquuqdaada gaar-lahaansho lagu xadgudbay, ama aadan oggoleyn go'aanka aan ka sameynnay dhexgalka dhigaalladaada, waxaad kala xiriiri kartaa xafiiska U-qeybsanaha Caafimaadka:

Franklin County Public Health
280 East Broad Street
Columbus, Ohio 43215

Debra Wright, Privacy Officer
Telephone: (614) 525-3160
Fax: (614) 525-6672
E-mail: dkwright@franklincountyohio.gov

Ugu dambeyn, waxaad u diri kartaa ashtako qoraala Xafiiska Adeegyada Xuquuqaha Aadannimo ee Madaniga iyo Waaxda Caafimaadka ee U.S. waxaad ka wici kartaa 1-(866)-627-7748 si aad u hesho cinwaankooda.

Si kasta oo ay tahay laguma ganaaxi doono ama lagaama aarsan doono marka aad xareyso ashtako.

Xog gaar-lahaansho waxay diyaar ku tahay barta www.myfcph.org

Qeybta Foomka Waafaqsanaanta:
Fatuuradda Ogeysiis ee Dhaqammada Gaar-Lahaansho

Waan akhriyey iyo/ama waxaa la ii sharraxay xuquuqdayda iyo waajibaadka quseeya xogta caafimaadkeyga. Anoo saxiixaya hoos, waxaan aqoonsanahay helitaanka ogeysiiskaan ah hadal ee dhaqammada gaar-lahaansho.

Magaca Dambe: _____

Magaca Hore: _____ **M.DH.** _____

Saxiix: _____

Taariikh: _____/_____/_____

Franklin County
Public Health

Ogeysiis Gaar-Lahaansho Dhaqammo Kooban

Lagu noqday 8-28-13

OGEYSIISKAANI WUXUU SIFEYNAYAA SIDA XOG CAAFIMAADEEDKA ADIGA KUGU SAABSAN LOO ADEEGSAN KARO LOONA MUUJIYEY IYO SIDA AAD U DHEXGELI KARTO XOGTAAN. FADLAN SI TAXADDAR LEH U FIIRI.

Haddii aad qabto su'aal miday tahayba, fadlan la xiriir sarkaalkayaga gaar-lahaansho, kaas oo magaciisu iyo lambarkiisuba ku qoran yihiin dhabarka qoraalkaan.

Yaa raacaya ogeysiiskaan?

Franklin County Public Health (FCPH) waxay xannaano caafimaad siisaa bukaankayaga, degganayaal, iyo macaamiisha wax la wadaaga takhaatiirta iyo shaqoyahanno iyo ururro, dhaqammada gaar-lahaanshaha xog ee ogeysiiskaan waxaa raaci doona:

- Shaqoyahan xannaano caafimaad oo kasta kaasoo kugu daaweeya adiga meelo kastoo ay damaanatay-FCPH.
- Dhammaan qeybaha FCPH.
- Dhammaan la-hawlgalayaasha, shaqaale ama kuwa iskaa wax u qabso ku shaqeeya ee FCPH.
- La-hawlgale ganacsi ee kasta ama la-wadaage FCPH/da kaasoo aan la wadaagno xog caafimaad.

Waxaan kaa ballanqaadaynnaa

Waxaan garaneynnaa in xog caafimaadeedka adiga kugu saabsan uu yahay mid qofeed. Waxaan naga go'an inaan dhawrnaynno xog caafimaadeedka adiga kugu saabsan. Waxaan abuurnaa dhigaal (record) xannaano iyo adeegyo aad hesho si aan kuu siinno xannaano tayo leh iyo inaan raacno rabitaanno sharciyeedka. Ogeysiiskaani wuxuu la falgelayaa dhammaan dhigaallada ku saabsan xannaanadaada ee aan wadno, ha abuuraan shaqaalaha FCPH ama takhtarkaaga qofeed e. Waxaa annaga sharcigu naga rabaa:

- U-haynta xog caafimaadeedka adiga kugu saabsan gaar-lahaansho.
- Inaan ku siinno ogeysiiskaan oo ka mid ah waajibaadkayaga sharciyeed iyo dhaqammada gaar-lahaansho ee tixgelinaaya xog caafimaad ee adiga kugu saabsan.
- Inaan raacno qodobbada ogeysiiskaan ee hadda meelmarka ah.

Isbaddellada ogeysiiskaan

Waxaan baddeli karnaa siyaasadahayaga gaar-lahaansho waqti kasta. Isbaddelladu waxay quseyn doonaan xogaha caafimaad ee aan horaba u haynnay, sidoo kale xogaha cusub ee yimid ka dib isbaddellada. Ka hor inta aannaan ku sameyn siyaasadahayaga gaar-lahaansho isbaddal door ah, waxaan baddeli doonnaa ogeysiiskayaga waxaanna ku dhajin doonnaa ogeysiiska cusub meel muuqata ee dhismaha ka mid ah ama meelo fayodhawr. Waxaad ka heli kartaa ogeysiiska hadda ah ama siyaasadda nuskhad waqti kasta. Taariikhda dhaqangelintu waxay ku taxan tahay isla hoosta cinwaanka. Waxaa laguu soo bandhigi doonaa nuskhad ogeysiiska hadda ah marka aad marka hore iska diiwaan geliso dhismahayaga ama meelo fayodhawr iska daaweyn awgeed. Waxaa kaloo lagu weyddiin doonaa inaad qoraal ku oggolaato helitaankaaga fatuuraddaan.

Sida aan u adeegsan karno iyo muujinta xog caafimaadeedka adiga kugu saabsan

Waxaan u adeegsan karnaa una muujin karnaa xog caafimaadeedka adiga kugu saabsan si laguu daweeyo (sida u dirista xog caafimaadeed adiga kugu saabsan ku-takhasuse iyadoo qeyb ka ah tixraacid); si loo helo lacagbixin daaweyn (sida u diris xog qaansheeg shirkadda caymiskaaga ama Medicare); iyo si loo caawiyo hawlgalladayada xannaano caafimaad (sida isu barbardhidda xogaha bukaanka si loo hagaajiyo hababka daaweynta).

Waxaan adeegsan karnaa ama muujin karnaa xog caafimaadeedka adiga kugu saabsan **iyadoon** hore loo helin taladaada sababo dhawra oo jira awgood. Iyadoo ku xiran waxyaalo la isaga baahan yahay, waxaa suurtoggal ah inaan bixinoo xog caafimaadeed adiga kugu saabsan iyadoon hore loo helin taladaada **ulajeeddooyin caafimaad guud** awgood (ilaalinta caafimaad bulsho, baaritaan, ama raadraac), **jawrfal ama ka-warbixin dayac, xisaabinoo goob caafimaad ama kormeerro, daraasado baaritaan, abaabullo duugitaan iyo xubno ku-deeqid, ujeeddooyin magdhaw shaqaale, iyo degdegyo.** Waxaan kaloo muujinnaa xog caafimaadeed **marka uu sharcigu dalbado**, sida marka loo jawaabayo codsi ka yimid sharci xoojinta ee xaalado gaar ahaaneed, ama loo jawaabayo garsoor dhaba ama amarro maamul.

Waxaan kaloo suurtoggal ah inaan kula soo xiriirno **xusuusinno ballameed** awgood, ama kuu sheegno ama **khiyaarro suurtoggal** ah ee **daaweyntaada** oo lagu taliyey, **kuwo kale, danooyin la xiriira-caafimaad ama adeegyo** laga yaabo inaad danaynayso adigu.

Franklin County
Public Health

Waxaa suurtoggal ah inaan u muujinno xog caafimaadeedka adiga kugu saabsan **saaxiib ama xubin qoys oo ku hawllan xannaanadaada caafimaad**, ama talisyada gargaarka aafooyinka si markaas qoyskaaga loola socodsiiyo meeshaada iyo xaaladdaada.

Adeegsiyada kale ee xog caafimaadeed

Si kastoo kale oo uusan ogeysiiskaani daboolin, waxaan ku weyddiin doonnaa taladaada oo qoran intii aannaan adeegsan ama aannaan muujin xog caafimaadeed adiga kugu saabsan. Haddii aad doorato inaad ku taliso adeegsi ama muujin, waxaad mar dambe celin kartaa taladaas adigoo nala socodsiinaya go'aankaaga oo qoran.

Xuquuqdaada quseynaysa xog caafimaadeed adiga kugu saabsan

Inta badan arrimaha, **waxaad xaq uu leedahay inaad fiiriso ama hesho nuskhadda xog caafimaadeed** taas oo aan u adeegsanno sameynta go'aannada ku saabsan xannaanadaada, markii aad gudbiso codsi qraala. Haddii aad codsato nuskhado, waxaa suurtoggal ah inaan khidmad kugu saarno kharashka nuskhadeynta, warqadodir ama helitaannada la xiriira. Haddii aan diidno inaan codsigaaga eegno ama inaad hesho nuskhad, waxaad soo gudbin kartaa codsi qoraala si loo eego go'aankaas.

Haddii aad rumeysan tahay in xogta ku jirta dhigaalkaaga inaysan sax aheyn ama ay ka maqan tahay xog muhiim ah, **waxaad xaq u leedahay inaad codsato inaan saxno dhigaallada** adoo soo gudbinaya codsi qoraala kaasoo muujinaaya sababta aad u codsatay kabmaha. Waxaa suurtaggal noqon karta inaan diidno codsigaaga kabmo ee dhigaal haddii aannaan annagu xogta sameyn; haddii aysan qeyb ka aheyn xog caafimaadeedka aan annagu dhaqangelinno; ama haddii aan go'aasanno in dhigaalku saxan yahay. Waad ka garceshan kartaa iyadoo qoraala go'aankayaga ah inaan la kabin dhigaal.